Ireland

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

EUROPEAN UNION AGENCY FOR ASYLUM

# WAXAAD U BAAHAN TAHAY IN AAD KA OGAATO CODSASHADA MAGANGALYADA

## HOOSTA XEERKA ILAALINTA CAALAMIGA AH EE 2015

## MACLUUMAADKA CARUURTA AAN LA KOOBAN




Hello, waxaan nahay caruur ka timid wadamo kala duwan. Waxaan safar dheer soo marnay kahor intaanan imaan Ireland si aan difaac u raadsano. Waxaan ku gaarnay iskeen, waalidkeen la'aanteed.
Hello. Magacaygu waa Lisa. Waxaan kuu sharixi doonaa waxaad u baahan tahay inaad ka ogaato codsiga magangalyada (sidoo kale loo yaqaan magangalyada caalamiga ah).

# Waa maxay ilaalinta caalamiga ah?







Haddii qofku uusan ku laaban karin waddankiisii hooyo sababtoo ah waxay halis ugu jiraan halkaas, waxay heli karaan ilaalin caalami ah oo ay ammaan ku joogaan waddankii siiyey ilaalintan.

Turjubaankaaga iyo shaqaalaha socdaalka ayaa kuu sharxi doona qofka heli kara magangalyada caalamiga ah iyo waxa nidaamku yahay.

Yurub dhexdeeda, ilaalinta caalamiga ah waxa kale oo loogu yeedhi karaa magangelyo, xaalad qaxooti ama ilaalin hoosaad. Waxaa laga yaabaa inaad horey u maqashay ereyga magangalyo. Waxaan isticmaali doonaa ereyga magangelyo markaan ka hadlayo ilaalinta caalamiga ah maadaama ay kuu sahlan tahay inaad xasuusato.

**Xusuusnow, hadda waad nabad qabtaa.**

**Qof walba si siman ayaa loola dhaqmaa Yurub iyadoo aan loo eegin meesha uu ka yimid, diintiisa iyo midabka maqaarkiisa.**





Yurub dhexdeeda, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo arkaa ilmo.

Markaad caruur tahay waxaad leedahay xuquuq gaar ah. Badbaadadaada iyo fayoobaantaadu aad bay muhiim u yihiin.



Waxaad la kulmi doontaa masuuliyiin kala duwan, sida shaqaalaha maamulka magangalyada, sida halkan ka muuqata. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo kugu saabsan adiga iyo safarkaaga Yurub.

Xusuusnow, saraakiishu waxay halkan u joogaan inay ku ilaaliyaan oo ay go'aan ka gaaraan waxa adiga kuu wanaagsan.

Waxaad had iyo jeer la wadaagi kartaa mas'uuliyiinta waxaad u maleyneyso, waxaad u baahan tahay iyo sida aad dareemeyso.



# Ma heli karaa wakiil sharci





Maadaama aad halkan ku timid adigoon la socon waalidkaa, mas'uuliyiintu waxay kuu qoondeyn doonaan qareen ku taageera haddii aad sidaas codsato.

Qareen ayaa ku raaci doona wareysi kasta oo aad la yeelaneyso mas'uuliyiinta qaabilsan arrimaha magangelyo-doonka, si loo hubiyo in xuquuqdaada la dhowro isla markaana aad awooddo inaad sheegto sheekadaada.





Looyar ayaa u jooga inuu kuu sharxo wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ogaato iyo inuu kaa caawiyo inaad gaadho go'aamo muhiim ah. Tusaale ahaan, qareen ayaa kaa caawin doona codsigaga magangelyo , sharxi doona nidaamka , sharxi doona xuquuqdaada iyo waajibaadka iyo ka qaybqaadashada kulamada aad la yeelanayso maamulka.

Had iyo jeer waxaad u sheegi kartaa qareenka ra'yigaaga, weydii su'aalo oo u sheeg haddii aad wax u baahan tahay. Waxay u joogaan inay ku taageeraan.





# Maxaa caawimo ah oo la siin doonaa inta hawsha lagu gudo jiro?





meel naoobdoon lagu hoydo



dharka



waxyaabo kale oo aad u baahan karto



Cunto



Waxaad aadi kartaa dhakhtarka.



waxaad aadi doontaa dugsiga



Waxaad ku noolaan doontaa meel adiga kuu fiican oo waxaad heli doontaa gargaarka aad u baahan tahay iyadoo ku xiran da'daada

# Waxaan waydiistay magangalyo, maxaa dhici doona hadda?






**Marka hore, waa inaad dalbataa magangalyo**

Qareenkaaga, turjumaanka, iyo dadka waaweyn ee ka shaqeeya meesha aad ku nooshahay ayaa ku wargelin doona maalmaha iyo waqtiyada qareenkaaga ayaa kuu raaci doona maamulka.

Qareenkaaga ayaa kula joogi doona inta hawsha lagu gudo jiro.



# Markaad dalbato magangalyo, waa kan waxa ku xiga...





Waxaad tusi doontaa saraakiisha dhammaan dukumeentiyada aqoonsiga ee aad wadato (baasaboor, kaarka aqoonsiga, iwm.).

Waxaa suurtogal ah in adiga iyo alaabtaada gaarka ah la baaro. Maamulka ayaa wax walba kuu soo celin doona, marka laga reebo alaabta khatarta ah.





Waa lagu sawiri doonaa

Farahaaga ayaa lagaa qaadi doonaa







Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto dhakhtar oo aad la kulanto shaqaale bulsho oo tababaran kaasoo fahmi kara haddii aad u baahan tahay caawimaad si kasta

sarkaal ayaa ku weydiin doona su'aalo adiga kugu saabsan iyo qoyskaaga ku sugan Yurub

sarkaal ayaa ku weydiin doona inaad bixiso macluumaadka aga xiriirka (cinwaankaaga iyo lambarkaaga taleefanka).



Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan:

adiga iyo qoyskaaga

Dalkaaga iyo meelihii aad markii hore ku noolayd

sababta aad uga soo tagtay dalkaaga iyo sababta aanad u doonayn inaad ku noqoto

sida aad ugu safartay Ireland



## Xusuusnow!

Aad bay muhiim u tahay inaad la hadasho qareenkaaga oo aad la shaqeyso mas'uuliyiinta magangalyada.



Waxa aad u sheegto qareenkaaga ama saraakiisha waxay ahaan doonaan qarsoodi. Taas macnaheedu waa in xogta aad siiso aan marnaba lala wadaagi doonin dawladda dalkaaga hooyo iyo dadka aad ka baqayso.





**Ma ku sii sugnaan doonaa Ireland inta lagu guda jiro habraaca magangelyo-doonka?**



Markaad codsigaaga gudbiso, mas'uuliyiintu waxay go'aamin doonaan dalka baari doona codsigaaga. Waxay noqon doontaa Ireland ama dal kale oo Yurub ah. Ma dooran kartid dalka, laakiin waxaa la tixgelin doonaa danahaaga ugu wanaagsan. Mas'uuliyiintu way kuu sharxi doonaan arrintan.





Waa muhiim inaad mas'uuliyiinta u sheegto inta lagu guda jiro habka codsiga:

haddii aad qoys ku leedahay waddan kale oo Yurub ah

haddii aad hore u codsatay magangelyo waddan kale oo Yurub ah.

Haddii aad qoys ku leedahay Yurub, waa muhiim inaad saraakiisha u sheegto wax kasta oo aad ka ogtahay qoyskaaga. Waxaa laga yaabaa inaad la joogi karto iyaga, ha ahaato waddankan ama waddanka ay ku nool yihiin.

Haddii aadan aqoon halka uu qoyskaagu joogo, ama aad weyday xiriirkii aad la lahayd, waxaad ka codsan kartaa shaqaalaha Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah (International Protection Office) inay kaa caawiyaan helitaanka qoyskaaga.



# Maxaa dhici doona ka dib marka aan codsado?





Waxaa lagu siin doonaa kaar yar oo loo yaqaan "Kaarka Degganaanshaha Kumeel-gaarka ah" (Temporary Residence Card), kaas oo kuu oggolaanaya inaad joogto dalka Ireland.

Dukumeentigan waa mid muhiim ah, sidaa darteed si fiican u ilaali. Waa inaad wadataa mar kasta oo aad ka baxayso goobta aad deggan tahay ama marka aad kulan la leedahay mas'uuliyiinta.





# Sidee ayay saraakiishu ku ogaanayaan da'dayda?



Haddii aadan haysan dukumeenti caddeynaya da'daada, oo ay mas'uuliyiintu shaki ka qabaan da'daada, shaqaalaha hay'adaha qaabilsan arrimaha magangelyo-doonka ayaa laga yaabaa inay kaa codsadaan inaad marto habka lagu qiimeeyo da'da. Tani waa hab lagu qiyaaso da'daada.

Waxaa jira siyaabo kala duwan oo lagu qiyaaso da'daada.

Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inay ku salaysnaato dukumeentiyada aad soo gudbisay ama wareysiyo lala yeesho saraakiil ama khubaro kala duwan.

Haddii qiimeynta da'du ay muujiso inaad ka weyn tahay 18 sano, waxaa lagugu tixgelinayaa inaad tahay qof qaangaar ah. Xaaladdan oo kale, waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah.





Haddii mas'uuliyiintu ay u arkaan in qof ku dhibaateeyay, waxay kuu soo jeedin doonaan inaad dhakhtar aragto.

Natiijooyinka baaritaanka caafimaadka ayaa la tixgelin doonaa marka la eegayo codsigaaga.



Iyadoo qayb ka ah codsigaaga, waxaa laga yaabaa inaad marto hal wareysi ama in ka badan oo shaqsi ah.

Tani waxay ka dhigan tahay in sarkaal uu ku weydiin doono su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan naftaada, sababta aad dalkaaga uga soo tagtay, iyo sababta aadan u doonayn inaad dib ugu laabato. Haddii mas'uuliyiintu ay kaa codsadaan inaad ka qaybqaadato wareysi, waa inaad ka soo qayb gashaa oo aad u sheegtaa wax kasta oo aad xasuusan karto.

Qareenkaaga ama wakiilka hay'adda qaabilsan arrimaha magangelyo-doonka ayaa kuu sheegi doona goorta iyo meesha uu wareysigu ka dhici doono, waxayna ku garab istaagi doonaan inta uu wareysigu socdo.



# Ka warran haddii aanan fahmin luqadda ay ku hadlayaan saraakiishu?





Haddii aadan fahmin luqadda Ingiriisiga, waxaa ku caawin doona turjumaan ku hadla luqaddaada si aad u fahanto.

Turjumaanku ma laha wax door ah oo ka baxsan turjumidda waxa la sheegayo marka ay timaaddo kiiskaaga. Wax kasta oo aad u sheegto sarkaalka kiiska iyo turjumaanka way ahaan doonaan kuwo qarsoodi ah.

Iyadoo ku xiran waxa adiga kuu fudud ama aad ku dareemayso raaxo badan, waxaad codsan kartaa in qofka wareysiga qaadaya ama turjumaanku uu noqdo haweeney ama nin. Waa la kuu diyaarin doonaa haddii ay heli karaan. Mas'uuliyiinta u sheeg sida ugu dhakhsaha badan — iyo ka hor inta aan la bilaabin wareysiga — haddii aad doorbidayso inuu noqdo haweeney ama nin.



# Waa maxay muddada ay wax walba qaadanayaan?





Wareysiga ka dib, waxaa la eegi doonaa wax kasta oo aad sharaxday.

Waxaa laga yaabaa inaad sugto ilaa 6 bilood si aad u hesho go'aanka. Sugitaanku wuxuu noqon karaa mid dhib badan, laakiin samir yeelo. Mas'uuliyiintu waxay doonayaan inay qaataan go'aan sax ah oo adiga ku saabsan.



**Saaxiib ayaa sheegay in mas'uuliyiintu aysan dib u eegis ku sameyn doonin codsigiisa magangelyo-doonka. Maxaa sababay taas?**





Mas'uuliyiintu marka hore waxay hubinayaan inay u baahan yihiin inay eegaan codsiga magangelyo-doonka iyo in kale.

Waxaa laga yaabaa inaanay mas'uuliyiintu si buuxda u eegin codsigaaga haddii horey laguu siiyay ilaalin waddan kale, ama haddii aad ka timid waddan ay u arkaan mid ammaan ah.

# Go'aan noocee ah ayaan heli doonaa?





Mas'uuliyiinta qaabilsan arrimaha magangelyada ayaa go'aamin doona haddii aad u baahan tahay magangelyo iyo in kale, ama haddii ay jiraan xulashooyin kale oo kuu bannaan.

Go'aankaas ayaa laguu sharxi doonaa.



Haddii aad hesho go'aan diidmo ah, oo adiga ama qareenkaagu aydnaan ku qanacsanayn, waad ka hortagi kartaa. Tan waxaa loo yaqaannaa racfaan.







# Qareenkaagu wuxuu kaa caawin karaa inaad:



U diyaar garow wareysiga aad la yeelanayso mas'uuliyiinta.



La hadal saraakiisha arrimaha magangelyada.



Fahan go'aanka laga gaaray codsigaaga magangelyada iyo racfaanka, haddii adiga ama qareenkaagu aydnan ku qanacsanayn go'aankaas.



Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa UNHCR wakhti kasta inta lagu guda jiro habraacaaga magangelyo-doonka.

UNHCR waxay taageertaa oo ay ilaalisaa dadka magangelyo-doonka ah iyo qaxootiga.

Shaqaalaha UNHCR waxay dadka magangelyo-doonka ah siiyaan macluumaad iyo caawimaad.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa https://help.unhcr.org/.



UNHCR
The UN Refugee Agency



## Sidee ayaan u heli karaa caawimaad haddii aanan caafimaad qabin ama aan si joogto ah u walwalo?



U sheeg sarkaal ama shaqaalaha ka shaqeeya goobta aad deggan tahay haddii:



Qof baa ku dhaawacay.

Waxaad dareemaysaa murugo, xanaaq, cabsi, ama waxaa kugu adag inaad seexato.

Haddii aad qabto caqabado kale, sida naafonimo ama xanuun, ama haddii aad uur leedahay.

Xaaladahaas oo kale, waxaad heli doontaa caawimaad.

# Ma jiraan wax waajibaad ah oo saaran?



Haa



**Waa inaad u hoggaansantaa sharciyada iyo xeerarka dalkan.**

Haddii aad shaki ka qabto xeerarka ama sharciyada, weydii mas'uuliyiinta.




**Waa inaad joogtaa meesha lagu faray inaad joogto.**

Mas'uuliyiintu waxay kuu doorteen meel. Ha cararin hana ka bixin dalka Ireland adigoon fasax ka haysan mas'uuliyiinta.



**Waa inaad si wada jir ah ula shaqeysaan mas'uuliyiinta.**

Marka lagu codsado, waa in aad ka jawaabto su'aalahooda oo aad raacdo tilmaamaha.



**Daacad noqo oo u sheeg mas'uuliyiinta wax kasta oo aad ogtahay marka ay ku weydiiyaan su'aalo.**

Waxaad sheegto ayaa aad muhiim ugu ah codsigaaga.

Waxaa laga yaabaa inaadan wax walba xasuusan karin, ama aadan awoodin inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha. Haddii aadan wax xasuusan karin, ha samaysan jawaab been ah, balse sharax inaadan xasuusan karin.

**Waa inaad ka soo qayb-gashaa dhammaan ballamaha aad la leedahay hay'adaha mas'uulka ka ah.**

Ballamahani aad bay muhiim u yihiin. Waa inaad timaaddaa maalinta iyo waqtiga lagu siiyay.







**Waa inaad bixisaa macluumaad sax ah oo lagula soo xiriiri karo.**

Si aad u hubiso inaad hesho dhammaan macluumaadka iyo ballamaha, waa inaad mas'uuliyiinta siisaa cinwaan ama lambar telefoon. Qareenkuna wuxuu heli doonaa macluumaadkan, wuxuuna ku xasuusin karaa ballamahaaga. Haddii macluumaadkaaga xiriirku isbeddelo, u sheeg qareenkaaga iyo shaqaalaha hay'adaha qaabilsan arrimaha magangelyo-doonka. Waa muhiim inay awoodaan inay kula soo xiriiraan.

**Waa inaad dhammaan dukumeentiyada aad haysato ku wareejisaa mas'uuliyiinta.**

Ku wareeji dhammaan dukumeentiyada aad haysato ee adiga ku khuseeya iyo kuwa sharxaya sababaha aad uga soo baxday dalkaagii. Tan waxaa ka mid ah dukumeentiyada aqoonsiga (baasaboorka), shahaadada dhalashada ama dugsiga, warqadaha caafimaadka ama dukumeentiyo kale.

Waxaa loo baahan yahay inaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka iyo dukumeentiyada sida ugu dhakhsaha badan.

Haddii aadan hadda haysan dukumeentiyada, waad soo gudbin kartaa waqti dambe. Qareenkaaga ayaa laga yaabaa inuu kaa caawiyo helitaanka dukumeentiyadaas iyo u gudbintooda mas'uuliyiinta waqtigii loogu talagalay.

Haddii aadan awoodin inaad fuliso waajibaadkaaga, isla markiiba u sheeg qareenkaaga iyo shaqaalaha xafiiska magangelyada, oo sharax sababta.





# Maxaa dhacaya haddii aanan gudan waajibaadkayga?



Haddii aadan buuxin waajibaadkaaga, codsigaaga waxaa laga yaabaa inuu saameyn xun ku yimaado.

Waxaa laga yaabaa inaad lumiso qaar ka mid ah xuquuqaha iyo adeegyada taageerada.



**Nidaamkaaga magangelyo-doonka waa la joojin karaa ama waa la diidi karaa haddii aadan fulin waajibaadkaaga, tusaale ahaan haddii:**

aad ka jawaabi weydo su'aalaha ay ku weydiiyaan mas'uuliyiintu, ama

aad diiddo inay kaa qaadaan farahaaga, ama

aad ka baxdo goobta aad deggan tahay adigoon fasax haysan.

Xaaladahaas oo kale, mas'uuliyiintu waxay u qaadan doonaan inaadan si dhab ah u danaynayn codsigaaga. Waxaa meesha ka baxaya xaaladdaada ah qof magangelyo-doon ah, waxaana kaa dhammaanaya dhammaan taageerada laguu hayay.



Haddii aadan mas'uuliyiinta u sheegin runta ku saabsan naftaada ama sheekadaada, ama haddii aad qarisid macluumaad muhiim ah ama aad si ula kac ah u burburisid dukumeentiyadaada, waxaa laga yaabaa in codsigaaga la diido oo aan lagu siin magangelyo.

Haddii ay mas'uuliyiintu markii dambe ogaadaan inaadan runta sheegin intii lagu jiray habraaca magangelyo-doonka, waxaa laga yaabaa in lagaa qaado magangelyada.







Waxaan kuu sharraxay waxyaabaha ugu muhiimsan ee ay tahay inaad ogaato. Qareenkaaga iyo mas'uuliyiintu waxay ku siin doonaan sharraxaad dheeraad ah inta lagu guda jiro habraaca magangelyo-doonka.




Xusuusnow!
Codsashada magangelyada waa bilaash.



# Ka digtoonow

Ka digtoonow dadka kuu soo bandhigaya caawimaad iyagoo beddelkeeda doonaya waxyaabo kale ama lacag. Waxaa laga yaabaa inay leeyihiin ujeeddooyin xun.



Qof ayaa laga yaabaa inuu kugu dhiirrigeliyo inaad isku daydo inaad baxdo. Laakiin xusuusnow inaadan bixin, maadaama ay taasi khatar kugu noqon karto.





Si degdeg ah u sheeg qareenkaaga, ama dadka waaweyn ee ka shaqeeya goobta aad deggan tahay, haddii qof uu isku dayayo inuu kaa dhaadhiciyo inaad sameyso wax aadan rabin ama wax u muuqda inay khaldan yihiin.



# Ka warran haddii aan doonayo inaan ku laabto dalkaygii oo aan joojiyo codsigayga; maxaan sameeyaa?





Haddii aad rabto inaad ku laabato dalkaagii oo aad joojiso codsigaaga, u sheeg qareenkaaga iyo mas'uuliyiinta. Waxay kaa caawin karaan inaad si ammaan ah u laabato.



## Haddii aad su'aalo dheeraad ah ka qabto waxa aan hadda sharraxay, weydii qareenkaaga, mas'uuliyiinta, ama shaqaalaha ka shaqeeya goobta aad deggan tahay.



This brochure is for information purposes only. It does not in itself create rights or obligations. The European Union Agency for Asylum (EUAA) has provided the main body of this material, and reproduction of and alteration to this brochure is authorised by the EUAA only for EU Member States. The EUAA does not accept any responsibility or liability for the accuracy, content, completeness, legality or reliability of the information included in this brochure by EU Member States or by any other responsible third party. Neither the EUAA nor any person acting on behalf of the EUAA is responsible for the use that might be made of the information found in this brochure.

© European Union Agency for Asylum, 2025